**[Geli Magaca Bixiyaha Guryaha[1]]**

# Ogeysiinta Xaquuqda Daganaanshaha sida waafaqsan Xeerka Xadgudubka Kadhanka ah Dumarka[2]

## Ee ku socoto dhammaan Kireystayaasha iyo Codsadayaasha

Xeerka Xadgudubka Kadhanka ah Dumarka (VAWA) waxuu difaacaa dhibanayaasha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalida.VAWA madifaaco kaliya dumarka, laakin waxuu si simman udifaacaa dhammaan shaqsiyaadka yadoo aan laga eegin jinsiga, aqoonsiga jinsiga, ama dooqa galmada.[3]Waaxda Guriyeynta iyo Hormarinta Magaalada ee Mareykanka (HUD) waa hay'ad Faderaali ah oo kormeerta in **[geli magaca barnaamijka ama caawinta kirada]** ay u hogaansantahay VAWA.Ogeysiintaan waxay sharaxdaa xaquuqahaaga sida waafaqsan VAWA.Foomka xaqiijinta ansixinta HUD wuxuu ku lifaaqanyahay ogeysiintaan.Waxaad buuxin kartaa foomkaan si aad u muujisid inaad tahay ama aad aheyd dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabaglka, iyo inaad rabtid inaad ku isticmaashid xaquuqdaada sida waafaqsan VAWA.

## Illaalada Codsadayaasha

Haddii aad u qalantid dhanka kale caawinta quseyso **[geli magaca barnaamijka ama caawinta kirada],** laguuma diido karo ogolaanshaha ama laguuma diidi karo caawinta sababtoo ah waxaad

[1] Ogeysiinta waxay isticmaashaa HP ee bixiyaha guriga laakin bixiyaha guriga waa inuu geliyaa magceeda halka HP loo isticmaalo.Aqoonsiga sharuudaha barnaamijka xeerarka gaarka ah ee shaqsiga ama masuulka bixinayo ogeysiinta xaquuqda danagaanshaha.
[2] Inkastoo uu jiro magaca sharcigaan, illaalada VAWA waxaa loo heli karaa iyada oo aan laga eegin jinsiga, aqoonsiga jinsiyada, ama dooqa galmada.
[3] Bixiyayaasha guryahay kuma takoori karaan si ku saleysan sifo walboo illaalsan, oo ay ku jiraan jinsiyada, midibka, asalka dhalashada, diinta, jinsiga, heerka qoyska, curyaannimada, ama da’da.Guryaha HUD-caawisay oo ku caymisan HUD waa in loo diyaariyaa dhammaan shaqsiyaadka u qalmo ee aan laga eegin dooqa galmada dhabta ama dooqa galmada loo gartay, aqoonsiga jinsiga, ama heerka guurka.

tahay ama aad aheyd dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

**Illaalada Kireystayaasha**

Haddii aad heleysid caawinta waafaqsan **[geli magaca barnaamijka ama caawinta kirada],** waxaa laga yaabaa inaan laguu diidin caawinta, laga joojin ka qeybqaadashada, ama laga saarin gurigaaga kirada ah sababtoo ah waxaad tahay ama aad aheyd dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

Sidoo kale, haddii adiga ama shaqsi xariir kula leh uu yahay ama ahaa dhibanaha rabashada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka ee xubinta qoyskaaga ama marti kale, laga yaabo inaan laguu diiidin caawinta kirada ama xaquuqaha daganaanshaha sida waafaqsan **[geli magaca barnaamijka ama caawinta kirada]** kaliya sida ku saleysan howsha dambiga ee sida tooska ah ula xiriirto rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

Shaqsiga xariirka kula leh waxaa laga wadaa xaaskaaga, waalidka, walaalka, walaasha, ama canuga, ama qofka taagan meesha waalidka ama masuulka (tusaale ahaan, shaqsiga ku raacsan ee daryeelkaaga ku jiro, haynta, ama maamulida); ama shaqsi walba, kireyste, ama shaqada sharci darada ee ku nool qoyskaaga.

**Ka saarida Xad gudbaha ama Dambiilaha Qoyska**

HP laga yaabo inay kala jaraan (kalaga goyn) heshiiskaaga si markaas looga saaro shaqsiga ama looga joojiyo caawinta shaqsiga ka qeybgalay howsha dambiga (ku xadgudbaha ama dambiilaha) sida tooska ah ula xiriiro rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

Haddii HP at doortaan in laga saaro ku xadgudbaha ama dambiilaha, HP laga yaabo inaysan ka qaadin xaquuqda kireystayaasha u qalmo qeybta ama haddii kale la ciqaabo kireystayaasha haray.Haddii ku xagudbaha laga saaray ama dambiilaha uu ahaa kireystaha kaliya ee la aasaasay u qalmida caawinta waafaqsan barnaamijka, HP waa inay u ogolaataa kireystaha ah ama ahaa dhibanaha iyo xubnaha kale ee qoyska inay ku haraan qeybta oo muddo waqti ah, si markaas loo aasaaso u qalmida sida waafaqsan barnaamijka ama sida waafaqsan barnaamijka kale guriyeynta HUD ee ay dabooleen VAWA, ama, hel guri kale.

Ka saarida ku xadgudbaha ama dambiilaha qoyska, HP waa inuu raacaa Faderaalka, Gobolka, iyo nidaamyada ka saarida deegaanka.Si markaas loo kala gooyo heshiiska kirada, HP laga yaabo, laakin loogama baahno inuu, ku weydiiyo waraaqaha ama cadeynta dhacdooyinka rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

**U guurista Qeyb Kale**

Xiliga codsigaaga, HP waxay kuu ogolaan kartaa inaad u guurtid qeyb kale, sida waafaqsan helitaanka qeybaha kale, iyo weli hayso caawintaada.Si markaas loo ansixiyo codsiga, HP wuxuu ku weydiin karaa inaad bixisid waraaqaha aad u codsaneysid inaad guurtid sababtoo ah dhacdada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka. Haddii codsiga loo codsado wareejinta degdega, bixiyaha guriga wuxuu ku weydiin karaa inaad xareysid codsi qoran ama buuxi foomka halka aad ka cadeysay inaad buuxisid sharuuda wareejinta degdega sida waafaqsan VAWA.Sharuuda waa:

> **(1)Waxaad tahay dhibane rabshada qoyska, taariiqda rabshada, weerarka galmada, ama dabagalka.** Haddii aad tahay bixiyaha guriga ee aan marhore laheyn waraaqaha cadaynaaya in aad tahay dhibanaha rabshada, rabshada

shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, bixiyahaaga guri wuxuu ku weydiin karaa waraaqo noocaas ah, sida lagu sharaxay qeybta waraaqaha hoose.

**(2)Waxaad si muujin ah u codsatay wareejinta degdega ah.**Bixiyahaaga guri wuxuu dooran karaa inuu kaaga baahdo inaad xareysid foomka, ama wuxuu ogolaan karaa codsi kaloo qoran ama hadal ah.

**(3)Waxaad si macquul ah u aaminsantrahay in laguugu hanjabay waxyeelo dhow ee rabshad dheeraad ah haddii aad ku hartid qeybta hadeer.**Tani waxay la micna tahay inaad sabab haysid oo aad ku baqdid haddii aadan helin wareejinta aad kula dhibaatoon laheyd rabshada mustaqbalka xiggo.

**AMA**

**Aad tahay dhibanaha weerarka galmada oo weerarka ay ku dhacday dhismooyinka inta lagu jiro muddada kaleendarka 90-maalmood ka hor inta aadan codsan wareejinta.**Haddii aad tahay dhibanaha weerarka galmada, kadib ay dheertahay u qalmida wareejinta degdega sababtoo ah waxaad si macquul ah u aaminsantahay in laguugu hanjabay waxyeelo dhow ee rabshad dheeraad ah haddii aad ku hartid qeybtaada, waxaad u qalmi kartaa wareejinta degdega ah haddii weerarka galmada ay ku dhacday dhismooyinka dhismahaan ee aad ka raadineysid wareejintaada, iyo in weerarka uu ku dhacay gudaha muddada kaleendarka 90-maalin ka hor inta aadan si muujin ah u codsanin wareejinta.

HP waxay joogteyneysaa codsiyada qarsoodiga ee wareejinta degdega ah ee dhibanayaasha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, iyo goobta guurida walba ee dhibanayaasha noocaas iyo qoysaskooda.

Qorshaha wareejinta degdega HP wuxuu bixiyaa warbixin dheeraad, iyo HP waa inay sameysaa koobiga qorshaha wareejintaan degdega ah ee adiga laguu heli karo haddii aad weydiisid inaad aragtid.

**Qorista Inaad Tahay ama Aad Aheyd Dhibanaha Rabshada Qoyska, Rabshada Shukaansiga, Weerarka Galmada ama Dabagalka**

HP waxay awoodaan, laakin loogama baahno inay, ku weydiiyaan inaad siisid waraaqaha lagu “cadeynayo” inaad tahay ama aad aheyd dhibanaha rabashada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.Codsiga noocaas ah ee HP waa inuu qoraal ahaan ahaadaa, iyo HP waa inay ku siisaa ugu yaraan 14 maalmo ganacsi (Sabtida, Axada, iyo fasaxyada Faderaalka lama xisaabiyo) ka bilow maalinta aad heshid codsiga lagu bixinayo waraaqaha.HP waxaa laga yaabaa, laakin ma ahan, kordhinta dhammaadka waqtiga ee gudbinta waraaqaha markii la codsado.

Waxaad u siin kartaa HP mid ka mid ah kuwa xiggo sida waraaqo.Waa dooqaaga midkee ka mid ah kuwa xiggo ayaa loo gudbinayaa haddii HP ku weydiiso inaad siisid waraaqaha ee aad tahay ama aad aheyd dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

- Foomka cadeynta dhameystiran ee ay ansixiyeen HUD ee adiga ay kula siiyeen HP ogeysiintaan, waraaqahaas dhacdada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.Foomka wuxuu ku weydiinayaa magacaaga, taariiqda, waqtiga, iyo goobta dhacadada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, iyo sharaxaada dhacdada.Foomka cadeynta waxay bixisaa oo ay ku jiraan magaca xadgudbaha ama dambiilaha haddii magaca xadgudbaha ama dambiilaha lagaranayo oo ay badbaado tahay in la sheego.

- Diiwaanka hay'ada fullinta sharciga Faderaalka, Gobolka, qabiilka, dhulka, ama deegaanka, maxkamada, ama hay'ada maamulka ee qortaa dhacdada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.Tusaalaha diiwaano noocaas ah waxaa ku jiro wargelinada booliska, amarada illaalada, iyo amarada xakameynta, ee kuwa kale ka mid ah.
- Bayaanka, ah inaad saxiixdo, oo ay la jiraan saxiixa shaqaalaha, hay'ada, ama tabarucaha bixiyaha adeega dhibanaha, qareenka, xirfadlaha caafimaad ama xirfadlaha caafimaadka maskaxda (isku jir ah, "xirfadlaha") aad ka raadisay caawinta lagu sheegayo rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka, ama saameynada xadgudubka, oo ay la jiraan xirfadlaha adiga aad doorotay ee lagu sheegayosida waafaqsan ciqaabta been sheegida ee isaga ama iyada aaminsanyahay in dhacdada ama dhacdooyinka rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka waa sababaha illaalada.
- Bayaan kaloo kale ama cadeynta ee HP ay la ogolaatay inaad ogolaato.

Haddii aad ku guuldareysatid ama aad diidid inaad sheegtid mid ka mid ah waraaqahaan ee gudaha 14 maalmood ganacsi ah, HP looma baahno inay ku siiso illaalada ku jirto ogeysiintaan.

Haddii HP hesho cadeyn qilaafeyso ee in dhacdada rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka way ka go'neyd (sida foomamka cadeynta ee ka imaanayo labo xubnood ama ka badan ee qoyska oo midkood sheeganayo inuu dhibane yahay oo magacaabayo hal codsi ama ka badan xubnaha qoyska ee codsanayo sida ku xadgudbaha ama dambiilaha), HP waxay xaq u leedahay inay codsato inaad sheegtid waraaqaha xisbiga sadexaad ee gudaha sodon maalmood 30 oo maalmaha kaleendarka si markaas loo xaliyo qilaafka. Haddii

aad ku guuldareysatid ama aad diidid inaad bixisid waraaqaha xisbiga sadexaad halka ay ka jirto cadeynta qilaafeyso, HP looma baahno inay ku siiso illaalada ku jirto ogeysiintaan.

**Qarsoodi ah**

HP waa inay joogteysaa qarsoodiga ama warbixin walba ee aad sheegtay ee ku saabsan ku dhaqanka xaquuqdaada sida waafaqsan VAWA, oo ay ku jiraan xaqiiqda ah inaad ku dhaqmeysid xaquuqahaaga sida waafaqsan VAWA.

HP waa inaysan u ogolaan shaqsi walba ee maamulayo caawinta ama adeegyada kale oo matalaada HP (tusaale ahaan, shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha) si ay u galaan warbixinta qarsoodiga ahillaa sababaha sida gaarka ah ugu yeero shaqsiyaadkaan inay galaan warbixintaan sida waafaqsan sharciga Faderaalka, Gobolka, deegaanka ee quseeyo.

HP waa inaysan galin warbixintaada goob walboo xog ee la wadaago ama u siideynin warbixintaada hay’ad ama shaqi kale.HP, si kastaba, waxay siideyn karaan warbixinta la sheegay haddii:

- Aad bixisid ogolaansho qoran HP ee lagu siideynayo warbixinta ee ku saleysan xadeynta waqtiga.
- HP waxay u baahantahay inay isticmaasho warbixinta ka saarida ama nidaamka ka joojinta, sida looga saarayo ku xadgudbahaaga ama dambiilaha ama ka joojinta ku xadgudbahaaga ama dambiilaha caawinta sida waafaqsan barnaamijkaan.
- Sharciga wuxuu u baahanyahay HP ama milkiilaha gurigaaga inuu siidaayo warbixinta.

VAWA ma xadeyso waajibaadka HP ee lagu sharfayo amarada maxkamada ee ku saabsan dhismaha ama lagu maamulayo.Tani waxaa ku jiro amarada loo sameeyay in lagu ilaaliyo dhibanaha iyo amarada ka kala goynayo dhismaha xubnaha qoyska ee xaaladaha halka qoyska kala go'o.

**Sababaha Kireystaha U qalma Xaquuqaha Daganaanshaha sida waafaqsan VAWA Waa Laga Saari Karaa ama Caawinta Waa La Joojin Karaan**

Waa lagaa saari karaa iyo caawintaada waxaa loo joojin karaa ku xadguudbka heshiiska guriga oo dhab ah ama lagu celiyay ee aan la xiriirin rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka la sameeyay ee adiga kaa soo horjeedo.Si kastaba, HP ma celin karto kireystaha ahaa dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka ee qaab sharciyada la dijiyay ee loo baahanyahay badelkii ay quseyso kireystayaasha ee aan aheyn dhibanaha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.

Illaalada lagu sharaxay ogeysiintaan way quseyn kartaa, oo waalagaa saari karaa iyo caawintaada la joojin karaa, haddii HP ay muujin karto inaysan kaa saareynin ama kaa joojineynin caawintaada waxay muujineysaa halis jirka dhab ah ee:

1) Ku dhici karto jadwalka waqti degdega ah, iyo
2) Sababi karto dhimasho ama waxyeelo jirka dhab ah ee kireystayaasha kale ama kuwa u shaqeeyo dhismaha.

Haddii HP ay muujin karto kuwa kore, HP waa inay joojisaa kaliya caawintaada ama kaa saartaa haddii aysan jirin tallaabooyinka la qaadi karo ee lagu yareynayo ama lagu baabi'inayo halista.

**Sharciyada Kale**

VAWA ma badesho sharci walboo Faderaalka, Gobolka, ama deegaanka ee siiso illaalo wanaagsan dhibanayaasha rabashada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka.Waxaad u qalmi kartaa illaalalada guriga dheeraadka ah ee dhibanayaasha rabshada qoyska, rabshada shukaansiga, weerarka galmada, ama dabagalka sida waafaqsan sharciyada Faderaalka, sidoo kale sida waafaqsan sharciyada Gobolka iyo deegaanka.

**Aan Uhogaansaneyn Sharuudaha Ogeysiintaan**

Waxaad soo waregelin kartaa xadgudubyada bixiyaha guriga ee ku daboolan xaquuqahaan oo raadiyaan caawin dheeraad ah, haddii loo baahanyahay, iyada oo lala xiriirayo ama la buuxinayo cabashada **[geli warbixinta xiriirka ee dhexdhaxaain walba, haddii ay quseyso]** ama **[geli xafiiska goobta HUD]**.

**Wixii Warbixin Dheeraad ah**

Waxaad eegi kartaa koobiga xukunka ugu dambeeyo ee HUD VAWA ee **[geli qadka Diiwaanka Faderaalka]**.

Waxaa dheer, HP waa inay sameysaa koobiga sharciyada HUD VAWA ee adiga laguu heli karo haddii aad weydiisid inaad aragtid.

Wixii su’aalo ee la xiriiro VAWA, fadlan la xiriir **[geli magaca barnaamijka ama warbixinta xiriirka caawinta kirada ee u suurtogaleyso inay ka jawaabaan su’aalaha VAWA].**

Wixii caawin ee la xiriiro xiriirka xadgudubka, waxaad soo wici kartaa Qadka Rabshada Qoyska ee Qaranka oo ah 1-800-799-7233 ama, dadka qaba curyaannimada maqalka, 1-800-787-3224 (TTY). Waxaad sidoo kale la xiriiro kartaa **[Geli warbixinta xiriirka ee hay’adaha deegaanka quseeyo]**.

Wixii kireystayaasha ee ah dhibane ama ahaa dhibane ee dabagalka oo raadinayo caawin wuxuu booqan karaa Xarunta Qaranka ee Dhibanayaasha Dambiga Xarunta Illaha Dabagalka ee https://www.victimsofcrime.org/our-programs/stalking-resource-center.

Wixii caawin ee la xiriiro weerarka galmada, waxaad la xiriiri kartaa **[Geli warbixinta xiriirka ee hay'adaha quseeyo]**

Dhibanayaasha dabagalka raadinayo caawinta waxay la xiriiri karaan **[Geli warbixinta xiriirka ee hay'adaha quseeyo]**.

**Lifaaqa:**Foomka cadeynta HUD-5382 **[foomka loo ansixiyay barnaamijkaan ee lagu darayo]**